



Warqadda Xaqiiqada Raridda Swansea Mews

(Juun 15, 2022)

Juun 14, Toronto Community Housing waxay bilaabeen habraac rrid oo rasmi ah oo loogu talogalay beesha Swansea Mews.

Juun 15, TCHC waxay qaban doontaa baqtiyaa-nasiib si loo siiyo reeraha lambar nasiib lagu soo saaray. Lambarka baqtiyaa-nasiibka waa hab cadaalad ah oo daahfuran oo go'aan looga gaarayo cidda heleysa usoo-bandhigidda aqalka marka ugu horeysa.

Marka keliya ee lambar baqtiyaa-nasiib lagu soo saaray la isticmaali doono waa haddii wax ka badan hal reer doorashadooda koowaad aay doortaan aqal isku mid ah. Reerka lambarka hooseeya ayaa loo soo bandhigi doonaa aqalka.

Baqtiyaa-nasiibka ka dib, kiraystayaasha waxay heli doonaan liiska aqalada xajmiga reerkooda eey isleeyihiin, kuwaasoo sida dookhoodu yahay aay u kala horeysiinayaan aqalda aay ogol yihiin in aay u guuraan.

Markii kiraystayaasha aay kala horeysiyaan aqalda aay heli karaan si waafaqsan dookhooda, TCHC waxay fiirineysaa qoys walbo doorashadiisa waxayna ku hagaajineysaa aqalka eey sida ugu badan u doorbidaayaan. Wuxaan mar walbo isku dayeynaa in aan u soo bandhigno doorashadooda koowaad.

Haddii wax ka badan hal reer aay xushaan isku aqal doorashadooda koowaad ahaan, waxaa la isticmaali doonaa lambarka baqtiyaa-nasiibka reerka loo soo bandhigi doono aqalka.

Markii TCHC aay dhameystirto isku-hagaajinta, kiraystayaasha waxay helayaan warqad loogu soo-bandhigayo guriga lagu hagaajiyeey, iyadoo aay la socoto casuumaad booqasho.



- Haddii aay aqbalaan soo-bandhigaddan, waxay saxiixayaan heshiis kiro oo loogu talogalay raridda ka dibna TCHC waxay qorsheyneysaa oo bixineysaa kharashkooda guuritaanka.
- Haddii aaysan aqbalin soo-bandhigidda, waxaa la gelin doonaa wareegga ku xiga ee isku-hagaajinta oo habraacana dib baa loo bilaabi doonaa.

Tusaale:

Marka la isugeeyo saddex qoys ayaa galay habraaca raridda: Qoys A, Qoys B iyo Qoys C. Kulligood waxay u baahan yihin aqal saddex qol-jiif ah.

Bilowgii raridda, saddexda qoys waxaa la siiyey lambar baqtiyaa-nasiib ah:

Qoys A – 2

Qoys B – 3

Qoys C – 1

Baqtiyaa-nasiibka ka dib, qoysaska waxay helayaan liiska aqalad saddex qol-jiif ah ee la heli karo.

Qoys A iyo Qoys B waxay ka dhigteen 123 Pine Street doorashadooda ugu sareysa. Marka kala horeysiinta doorashada dhamaato, TCHC waxay fiirisaa dookha qoysaska.

Maadaama qof kale uusan ka dhigan 456 Spruce Street doorashadooda ugu sareeysa, Qoys C ayaa la siinayaa u soo-bandhigidda aqalka.

123 Pine Street waxaa ka dhigtay doorashada koowaad Qoys A iyo Qoys B labadaba. Si loo go'aamiyo reerkee ayeey tahay in loo soo-bandhigo aqalka, TCHC waxay soo xiganeyssaa lambarka baqtiyaa-nasiibka ee reer walbo. Maadaama lambarka baqtiyaa-nasiibka uu leeyahay Qoys A (2) uu ka hooseeyo kan Qoys B (3). Qoys A ayaa aqalka loo soo-bandhigi doonaa. Qoys B waxaa loo soo bandhigi doonaa aqalka aay ka dhigteen doorashadooda labaad.